



XAQIIQOORYINKA TALLAALKA COVID-19

Tallaalka COVID-19 waa bilaash.

Waxaad heli kartaa tallaalka iyada oo aan ku xirneyn inaad ceymis leedahay ama sida ay tahay xaaladaada degenaansho.


Tallaalka COVID-19 waa ammaan.

Waxaa la mariyay dhamaan isla tallaabooyinka badqabka ee la mariyo tallaalka kasta.


Tallaalka COVID-19 waxtar ayuu leeyahay.

Tallaalka wuxuu aad ugu fiican yahay inuu dadka ka ilaaliyo cudurka COVID-19. Waxay qaadataa xoogaa muddo ah kadib cirbadaada ugu danbeyso si jirkaaga difaac ugu yeesho COVID-19. Qofka tallaalka ku siinaya ayaa kuu sheegi doona haddii aad u baahan tahay hal kuure ama labo kuure. Haddi aad u baahan tahay labo kuure, waxaa wanaagsan in la qaato labada kuuraba si loo yeesho ilaalada ugu wanaagsan.

TALLAALKA 2-DA KUURE



TALLAALKA 1-KA KUURE



mn MINNESOTA

mn.gov/vaccine